Casharka 16

1. Maxay qaabiil iyo faraciisa u noolaayeen?
-Waxay u noolaayeen faakihaysi, lacag iyo inay maal urursadaan.

2. Waayo Qaabiil wuxuu dilay Haabiil, miyaa haddaba Shayddaanku Ilaah ka istaajiyey wixii Ilaah go'aansaday inuu sameeyo?
-Maya.
-Ma jiro mid Ilaah ka istaajin kara inuu sameeyo wixii uu horey u go'aansaday inuu sameeyo.

3. Maaddaama Qaabiil uu dilay Haabiil, miyaa Ilaah illoobay ballankiisii ahaa inuu badbaadiye soo diri doono?
-Maya.
-Ilaah weligii ma illoobi ballamadiisa.

4. Maxaa Ilaah Aadan iyo Xaawo u siiyey wiilkii kale ee ay u bixiyeen Seet?
-Waayo Qaabiil wuxuu dilay Haabiil, Ilaahna wuxuu go'aansaday inuu Badbaadiyaha ka soo daahiriyo faracii Seet.

5. Maxay Aadan iyo Xaawo u dhinteen?
-Waayo Aadan iyo Xaawo waxay addeeci waayeen Ilaah oo waxay maqleen codkii Shayddaanka.

6. Maxaa dadka oo dhaniba u dhintaan?
-Dembiyadeenna awgii.

7. Waa maxay ciqaabta Ilaah u dejiyey dembiga?
-Dhimasho.



8. Muxuu Enook ka garanayaa Ilaah?
-Enook wuxuu garanayey inuu ahaa wiilkii Aadan iyo Xaawo.
-Enook wuxuu kaloo garanayey inuu ku dhashay Beer Ceeden dibaddeeda.
-Enook wuxuu garanayey inuu u dhashay inuu dhinto.

9. Maxaa Enook ka garanayey Ilaah?
-Enook wuxuu garanayey in Ilaah qoduus yahay.
-Enook wuxuu garanayey in Ilaah qoduus yahay.
-Enook wuxuu garanayey oo kale in Ilaah awooday inuu badbaadiyo.
-Enook wuxuu kaloo rumaysnaa in Ilaah soo diri doono Badbaadiyaha oo dadka laga samatabbixin doono Shayddaanka.

10. Maxay ahaayeen waxyalihii dhibka badnaa ee Enook sameeyey?
-Ilaah wuxuu Enook u qaaday jannada si uu ula joogo Isaga.

11. Maxay jannadu la mid tahay?
-Jannadu waa meel qurux badan halkaasoo aanay jirin murug iyo oohin, cudur ama dhimasho.

12. Maxaa Ilaah jannada u geeyey Enook?
-Waayo Enook wuxuu rumaysnaa Ilaah.
-Waayo Enook wuxuu Ilaah ugu yimid dariiqiisa.

-Kaddib markii Ilaah Enook jannada geeyey, sannado badan ayaa ka soo wareegay, oo dad badan ayaa dunidan ku dhashay.

-Markii haddaba faracii Seet iyo Enook ay raaceen Ilaah, badankood waxay maqleen Shayddaanka.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 6:1-2

1-Waxayna noqotay, markii ay bilaabatay in dadku ku bataan dhulka oo ay gabdho u dhshaan,
2-in wiilashii Ilaah arkeen gabdhihii dadku inay wanaagsan yihiin, oo ay guursadeen in alla intay doorteen oo dhan.

-Yey ahaayeen wiilashii Ilaah?

-Waa wiilashii ka soo farcamay Seet.
-Waxay ahaayeen kuwii rumaysta Ilaah.

-Yey ahaayeen gabdhihii dadka?

-Waxay ahaayeen gabdhihii ka soo farcamay Qaabiil.

-Waay ahaayeen hablihii aan rumaysan Ilaah.

-Maxay wiilashii ka soo farcamay Seet ku sameeyeen gabdhihii ka soo farcamay Qaabiil?

-Wiilashii faracii Seet ay aa waxay bilaabeen inay guursadaan gabdhihii faracii Qaabiil.

-Kuwii rumaystay Ilaah waxay bilaabeen inay guursadaan faracii aan Ilaah rumaysnayn.

-Maxaa dhacay markii wiilashii faracii Seet ay bilaabeen inay guursadaan gabdhii farachii Qaabiil?

-Dad badan ayaan doonaynin inay maqlaan Ilaah.



-Waxay doonayaan inay malqaan oo keliya Shayddaanka.

-Dad aad iyo aad u badan ayaan raacin Ilaadariiqa Ilaah.
-Dad aad iyo aad u badan ayaa waxay raaceen dariiqooda.

-Miyaad u malaynaysaa in Ilaah ku faraxsan yahay inaanay kuwo badan doonaynin inay isaga Maqlaan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 6:3

3-Rabbiguna wuxuu yidhi, Ruuxaygu lama sii dalaallami doono dadka weligiis, maxaa yeelay, isagu waa jidh, laakiinse cimrigiisu wuxuu noqon doonaa boqol iyo labaatan sannadood.

-Ilaah kuma faraxsana in kuwo badan aanay maqlaynin Isaga.

-Muxuu Ilaah u doonayaa in kuwo badan ay maqlaan Isaga?
-Si dadka aan loo wada dhammaynin.

-Markaana, Ilaah wuxuu yiri, waxaan la hadlayey dadka boqol iyo labaatan sannadood.

-Haddii dadka ay weli diiddan yihiin inay raacaan jidka Rabbiga, muxuu Ilaah samaynayaa?

-Ilaah wuxuu ku ciqaabayaa dhimasho.

-Sidee buu Ilaah ula hadlayaa dadka?

-Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah ayaa dadka maankooda la hadlayey.

-Muxuu Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah ku leeyahay dadka?

-Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah wuxuu dadka ku leeyahay Ilaah maqla, laakiin Shayddaanka ha maqlina.

-Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah wuxuu kaloo dadka ku leeyahay raaca jidka Rabbiga, laakiin ha raacina jidadkiinna.

-Miyaa Shayddaanku la hadlaa dadka maankooda?
-Haa.

-Maxaa hayddaanku ddka ku leeyahay?

-Shayddaanka wuxuu dadka u sheegaa inaan Ilaah la dhegaysan.

-Muxuusan shayddaanku u doonaynin in dadku dhegaystaan Ilaah?

-Shayddaanka dooni maayo in dadku dhegyastaan Ilaah si loo burburiyo.

-Haddii adigu aad diiddo inaad dhegaysato Ilaah oo la hadlaya maankaaga, dabeeto Ilaah baa idin ciqaabaya.

-Haddaba in shayddaanka la dhegaysto kama wanaagsana in Ilaah la dhegaysto.

-Inkastoo weliba Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah la hadlayey dadka, miyaa dadku maqleen Ilaah?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 6:11

11-Dhulkuna wuu kharribnaa Ilaah ortiisa, dhulkana dulmi baa ka buuxsamay.



-Inkastoo weliba Ilaaha Ruuxa Qoduuska ahi la hadlayey dadka, haddana dadkii waxay diideen inay Ilaah maqlaan.

-Dhulkuna wuxuu noqda meel dulmi ka buuxo.

-Maxaa lagu masaali karaa dadkii qarnigiinebi Nuux?

-Waxay ahaayeen niman irsaq maanac ah.
-Waxay kaloo ahaayeen nima hunguri weyn.

-Waxay ka masayrsanaayeen dadka kale.
-Waxay khiyaamayn jireen dadka kale.

-Waxay been u sheegi jireen dadka kale.
-Waxay shar kula hadli jireen dadka kale.

-Oo waxay nebcaayeen dadka kale.

-Waxay ahaayeen dad dulmi iyo shar badan.
-Waxay kaloo ahaayeen dad kharriban.

-Waxay la dagaallami jireen dadka kale.
-Waxay kaloo dili jireen dad badan.

-Mana ayan doonaynin jidka Rabbiga.
-Waxay keliyahoo doonayeen jidadkooda.

-Miyaa haddaba dadka maanta ay la mid yihiin dadkii wakhtigii Nuux?

-Haa.

-Miyaa dadka maanta ay kuwo hunguri daran oo irsaq maanac ah yihiin?

-Haa

-Miyaa dadka maanta joogaa ay been isku sheegaan oo xumaanna iska sheegaan?

-Haa.

-Miyaa dadka maanta doonayaan dariiqooda, laakiinse ayan doonayn dariiqa Rabbiga.

-Haa.

-Dadkaas waxay ahaayeen dembiileyaal waayo waxay ahaayeen faracii Aadan iyo Xaawo.

-Dadka maanta waxay ku dhasheen dembi waayo waxay ka soo farcameen Aadan iyo Xaawo.

-Dadka oo dhan waa dembiileyaal waayo innaga oodhan waxaynu nahay Faracii Aadan iyo Xaawo.

-Miyaa haddaba Ilaah arkaa dembiyada dadka?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 6:5, 12

5-Rabbiguna wuxuua rkay in dadka sharkiisu ku badan yahay dhulka, iyo in male kasta oo fikirrada qalbigiisu ay shar keliya yihiin had iyo goorba.
12-Ilaahna wuxuu arkay dhulka, oo bal eeg, wuu



kharribnaa; waayo, intii jidh lahayd oo dhammu jidkooday ku kharribeend hulka oodhan.

-Haa, Ilaah wuu arkay dembiyadooda oodhan.

-Ilaah wuxuu arkay dembi waliba.

-Ma jiro mid dembiyadiisa ka qarin kara Ilaah, waayo Ilaah wuxuu joogaa meel wlaiba.

-Ilaah wuxuu arkaa dembiyada oo dhan, wuxuuna ciqaabaa dembiyada oo dhan.

-Ilaah wuxuu arkaa dembiyada oo dhan, wuxuuna ku ciqaabaa dembiyada oodhan dhimasho.

-Maxay Ilaah la noqotay markii uu arkay dadka oodhan oo dembaabaya?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 6:6-7

6-Rabbiguna wuxuu ka qoomamooday samayntii uu dadka ku sameeyey dhulka, wuuna caloolxumaaday.
7-Oo Rabbigu wuxuu yidhi, Waxaan dhulka ka baabi'in doonaa dadkii aan abuuray; dadk, iyo weliba dugaagga, iyo waxa gurguurta, iyo haadda hawada; maxaa yeelay, waan ka qoomamooday samayntii aan sameeyey iyaga.

-Ilaah aad buu uga xumaayday waayo dadka oo dhaniba way dembaabeen.

-Waayo dhulka waxaa ka buuxay dembiyadii dadka, muxuu

haddaba Ilaah sameeyey?

-Ilaah wuxuu goostay inuu burburiyo dadka dunida oodhan.

-Waayo dhulka waxaa ka buuxay dembiga dadka, Ilaahna wuxuu goostay inuu burburiyo wixii naf-lahaa ee dunida joogay.

-Ma waxay kula tahay in Ilaah iska hadlayo?

-Mise waxay kula tahay in Ilaah samaynayo wixuu uu yiraahdo wuu samaynayaa?

-Ilaah wuxuu u sheegay Aadan iyo Xaawo inay dhimanayaan oo laga dhaqaajin doono Ilaah haddii ay cunaan mirihii laga xaaraantimeeyey.

-Miyaa Ilaah iska hadlayey mise wuxuu sameeyey wixii uu yiri wuu samaynayaa?

-Ilaah wuxuus ameeyey wixii uu yiri waan samaynayaa.

-Ilaah wuxuu Qaabiil iyo Haabiil ku yiri waa inay Ilaah ugu yimaadaan dariiqiisa, haddii kale la aqbali maayo.

-Miyaa Ilaah iska hadlayey mise Ilaah wuu sameeyey wixii uu yiri waan samaynayaa?

-Ilaah wuxuu sameeyey wixii uu yiri waan samaynayaa.

-Ilaah dadka lama mid ahan.

-Dadka waxay leeyihiin waxbaannu samaynaynaa, laakiin haddana



ma sameeyaan.

-Ilaah, haddaba, maahan sida dadka oo kale.

-Ilaah mar waliba wuxuu sameeyaa waxa uu yiraahdo waan samaynayaa.

-Jacaylka Ilaah iyo naxariistiisa aawadeed, waxaa yimid nin aanu Ilaah burburinaynin.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 6:8-10

8-Laakiin Rabigu Nuux raalli buu ka ahaa.
9-Kuwanu waa farcankii Nuux. Nuux wuxuu ahaa nin xaq
ah, oo ku eed la' farcankiisii; Nuuxna Ilaah buu la socon jiray.
10-Oo Nuux wuxuu dhalay saddwx wiil oo ahaa Sheem, iyo
Xaam iyo Yaafet.

-Waa maxay sababta Ilaah u go'aansaday inaanu Nuux burburinin?

-Ma in Nuux uusan dembaabin baa?
-Maya.

-Nuux wuxuu ku dhashay dembi sida dadka kale oodhan.

-Nuux wuxuu dhashay isagoo addoon u ah Shayddaanka sila sida dadka kale oo dhan.

-Maxay tahay sababta Ilaah u go'aansaday inaanu Nuux burburinin?

-Waayo Nuux ma maqlin  Shayddaanka.

-Waayo Nuux wuxuu maqlay Ilaah.

-Waayo Nuux wuxuu dhowrayey Badbaadiyaha.
-Waayo wuxuu raacay oo keliya dariiqa Ilaah.

-Waayo Nuux wuxuu garanayey inuu dembi ku dhashay.
-Waayo Nuux wuxuu garanayey inuu Ilaah ku dembaabay.

-Waayo Nuux wuxuu garanayey in Ilaah dembiyada ku ciqaabo dhimasho.

-Waayo waxaa Nuux garanayey in Ilaah oo keliya awood u leeyahay inuu badbaadiyo.

-Waayo Nuux wuxuu garanayey in Ilaah soo dirayo Badbaadiyaha, si uu dembiyadiisa u qaado.

-Waayo nimacada Ilaah awgeed, ayaa Ilaah goostay inaanu baabi'inin Nuux.

-Waa maxay nimcadu?

-Tusaale ayaa halkan yaalla:

-Nin tuug ah ayaa deriskiisa ka xaday xoolo marar badan.

-Maalin maalmaha ka mid ah, tuuggii baa lagu qabtay isagoo gudbi raba webi soo fatahay.

-Tuuggii qudhiisii baa waxaa qarqiyey biyihii webiga.

-Laakiin deriskiisii baa arkay, markaasay biyihii ka soo bixiyeen,



oo isaga badbaadiyeen.

-Inkastoo tuuggu marar badan iyaga xoolo ka xaday, haddana deriskiis way soo samatabixiyeen.

-Inkastoo tuuggu u qalmay dhimasho, haddana deriskiisii baa samatabbixiyey.

-Taasina waa nimcada.

-Waana sida Ilaah u badbaadiyyo dadka haddii aynu isaga rumaysanno.

-Maaddaama Nuux Ilaah rumaystay, oo Ilaahna goostay inuu Nuux badbaadiyo, ayuu wuxuu siiyey amar.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 6:13-14.

13-Oo Ilaah wuxuu Nuux ku yidhi, intii jidh leh oodhan dhammaadkoodii aan dhammayn lahaa ayaa gaadhay, waayo, dhulkii waxaa ka buuxsamay dulmi iyaga ka yimid, oo bal eeg, iyagaan dhulka la baabi'in doonaa.
14-Doonni ka samayso qoryo gofer ah; qolladona ka dhex samee doonnida, daamurna ka mari dusha iyo hoostaba.

-Maxaa Ilaah ku amray Nuux inuu sameeyo?
-Ilaah wuxuu Nuux ku amray inuu dhiso doonni.

-Waamaxay sababta Ilaah Nuux u siiyey amarkan uu doonta u dhisayo?

-Waayo Ilaah wuxuu doonayey inuu dhulka ku soo daayo daadsi

wax kasta ee nool uu dhulka uga baabi'iyo.

-Ilaah wuxuu siiyey amarro badan Nuux oo khuseeya sida loo dhisayo doonnida.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 6:15-21

15-Waa inaad sidatan u samaysid iyada; doonnida dhererkeeda waxaad ka dhigtaa saddex boqol oodhudhun, ballaadhkeedana waxaad ka dhigtaa konoton dhudhun, sarajooggeedana waxaad ka dhigtaa soddon dhudhun.
16-Waa inaad dariishadana u samaysid doonnida, oo waxaad ku dhammaysaa in dhudhun ah ilaa xaggeeda sare, albaabka doonnidana dhinac ka samee, dabaqad hoose, iyo tu labaad, iyo tu saddexaadna u samee iyada.
17-Oo bale eeg, anigu daad biyo ah baan ku soo dayn dhulka, inaan baabi'iyo inta jidhka leh oodhan oo neefta noloshu ku jirto, inta samada ka hoosaysa; wax kasta oodhulka joogaaba way dhiman doonaan.
18-Laakiin axdigayga adigaan kula dhigan doonaa; oo doonnidaad soo geli doontaan, adiga, iyo wiilashaada, iyo naagtaada, iyo naagaha wiilashaada ee kula jiraba.
19-Oo wax kasta oo nool oo jidh leh waa inaad cayn walba laba ka soo gelisaa doonnida, si ay kuula sii noolaadaan; waana inay ahaadaan lab iyo dhaddig.
20-Haadda caynkooda, yo xoolaha caynkooda, iyo wax kasta oo dhulka gurguurta caynkooda, cayn walba laba ka mid ahi ha kuu soo galeen, si ay u sii noolaadaan.
21-Cuntada la cuno oodhanna qaado, oo kulligeed ururso oow axay idiin noqon doontaa cunto, adiga iyo iyagaba.

-Ilaah wuxuu ku amray Nuux inuu dhiso doon dherirkeedu go'an



yahay.

-Ilaah wuxuu ku amray Nuux inuu dhiso doonni ballarkeedu go'an yahay.

-Ilaah wuxuu ku amray Nuux inuu dhiso doonni sara-jooggeedu go'an yahay.

-Miyaa Ilaah doonayey in Nuux dhiso doonni loo samaynayo sida Nuux doonayo?

-Maya.

-Ilaah ma uusan doonayn in Nuux doonnida u dhiso, sida Nuux doonayo.

-Sidee buu Ilaah doonayey inuu Nuux doonnida u dhiso?
-Wuxuu doonayey inuu u dhiso sidii Ilaah amray.

-Ilaah wuxuu doonayey in Nuux doonnida u sameeyo sida Ilaah ku amray.

-Dharkii Aadan iyo Xaawo waxaa loo sameeyey hannaankii Ilaah doonayey.

-Qaabiil iyo haabiilna waxay allabbariga u bixiyeen sidii Ilaah doonayey.

-Doonnidii Nuuxna waa in loo sameeyo sida Ilaah doonayey oo keliya.

-Ilaah iyo meeqa doonyood ayaa Ilaah ku amray in Nuux dhiso?

-Hal keliya.

-Waxaa kaloo jiray hal doonni oo keliya taasoo Nuux badbaadin karta.

-Ma jirto doon kale oo nuux badbaadin karta mid mooyaan.

-Imisa irdood baa Ilaah ku amray in doonnida loo yeelo?
-Hal irid.

-Waxaa kaloo jiray hal irrid oo Nuux ka gelayo si loo badbaadiyo.

-Ma jirto irrid kale oo nuux ka gelayo si loo badbaadiyo.

-Miyaad u malaynaysaa in Nuux adeeday Ilaah?

Bal aynu akhrinno Bilwogii 6:22.

22-Sidaasuu Nuux sameeyey; wax kasta sidii Ilaah ugu amray buu u sameeyey.

-Nuux wuxuu rumaystay Ilaah.
-Nuux wuxuu rumaystay in Ilaah aanu been sheegin.

-Nuux wuxuu rumaystay in Ilaah Daad soo dirayo, isla sidii Ilaah yiri.

-Markaa, Nuux wuxuu dhisay doonni loo sameeyey sida Ilaah yiri.

-Inkastoo Nuux uusan weli arag roob, Mxuu Nuux rumaystay?

-In Ilaah soo dirayo daad.



-Inkastoo qof dunida jooga aanu berigaas arag roob, muxuu Nuux rumaystay?

-I Ilaah soo dirayo daad.

-Maxaa Nuux rumaystay markii uu doonta dhisayey?

-Markii Nuux doonnida dhisayey, wuxuu dadka u sheegayey inay Ilaah maqlaan.

-Markii Nuux dhisayey doonnida, wuxuu dadka u sheegay inay Ilaah rumaystaan.

-Markii Nuux dhisayey doonnida, wuxuu u sheegay dadka in Ilaah uu soo dirayo daad dhulka burburiya.

-Isla sida aan aniguba Ilaah wax kaaga sheegayo, ayaa Nuux dadkii wakhtigiisa Ilaah ku wacdiyi jiray.

-Miyey kula tahay in dadkii ay dhegaysteen Nuux?

-Casharka xiga ayaannu taas ku ogaan doonnaa.